

DUGSIGA MADAXBANNAAN DEGMADA 196
Rosemount-Apple Valley-Eagan, Minnesota
Waxbaridda ardaydeena si ay u gaaraan awoodooda buuxda
Somali

Lambarka Taxanaha ah **204.8AR** La qaatay **Aktoobar 1977** waxaana dib loo eegay **Nofeembar 2023**

Cinwaanka **Ka Qaybgalka Dadweynaha Kulammada Guddiga Dugsiga**

1. Xubnaha dadweynaha waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay ka soo qaybgalaan shirarka Guddiga Dugsiga si ay wax badan uga bartaan barnaamijyada iyo waxqabadyada degmada, iyo inay la wadaagaan wixii talooyin, danayn ama soojeedin ah Guddiga Dugsiga. Xubno dadweyne ah ayaa laga yaabaa inay ka qaybgalaan shirarka Guddiga Dugsiga ee caadiga ah sida hoos lagu sharaxay.
2. **Wax ka qabashada Shayda Ajandaha** - Daneeyayaasha Degmada ayaa ka hadli kara shayada ajandaha ee Warbixinnada, Ganacsi Hore, Ganacsi Cusub iyo Waxqabadyo kale oo ka mid ah shirarka guddiga marka uu aqoonsado guddoomiyaha guddiga.
 - 2.1 Dadka hadlaya waxa la weydiin doonaa inay sheegaan magacyadooda iyo xiriirka ay la leeyihiin degmada (doorka daneeyaha) kahor inta aysan bilaabin faallooyinkooda.
 - 2.2 Dadka hadlaya waxa loo oggolaan doonaa inuu ka hadlo hal mar qodob ajande ilaa laba daqiiqo. Si hawsha loo wado si hufan oo dhammaystiran, tirada dadka ka hadlaya hal qodob oo ajande waxa lagu xaddidayaa toddoba.
 - 2.3 "Daneeyayaasha Degmada" ee xaq leh inay hadlaan waxa loo xaddiday degganayaasha degmada, hantiilayaasha degmada ama milkiilayaasha ganacsiyada, shaqaalaha degmada, ardayda hadda iyo waalidiintooda/wakiiladooda, qandaraasleyaasha degmada, hindiseyaasha qandaraasyada degmada ee u furan in la hindiso ama la bixiyey ee aan weli la dhammayn, iyo wakiilada ka idman daneeyayaasha kor ku xusan.
3. **U -sheegidda Guddiga Dugsiga Waxyaalaha Aan Ajandaha Ahayn** –Si loo oggolaado in dadweynaha la dhegeysto, isla markaasna ay si habboon oo hufan u qabtaan shirarkooda, hab -raacyo ayaa loo sameeyay dadka doonaya inay wax ka qabtaan guddiga muddada shir caadi ah waxyaabaha ku saabsan ajandaha kulanka. Daneeyayaasha Degmada sida ku qeexan qaybta 2.3., wxay kula xaajoon karaan Guddiga iyaga oo u gudbinaya Codsii Isgaarsiin Gaara.
 - 3.1 Xubin ka mid ah daneeyayaasha ayaa Codsii Isgaarsiin Gaar ah u gudbin kara (Habka 204.8.3P, Codsiga Isgaarsiinta Gaarka ah) Kaaliyaha Fulinta ee Isuduwaha iyo Guddiga Dugsiga oo aan ka yarayn shan maalmood oo shaqo kahor kulanka guddiga ee ay rabaan inay ka hadlaan. Keliya codsiyada kulanka xiga ee caadiga ah ee guddiga ayaa la tixegelinayaa: codsiyada kulanada caadiga ee soosocda ee guddiga lama oggola.
 - 3.2 Ku dhawaad 10 deneeye degmo oo ku soo gudbiya Codsii Isgaarsiin Gaara waqtiga la rabo ayaa la siinayaa afar daqiiqo si ay u bixiyaan faalladooda kulanka xiga ee caadiga ah ee Guddiga Degmada.
 - 3.3 Haddii in ka badan 10 daneeyo degmo ay ku soo gudbiyaan waqti habboon Codsii Isgaarsiin Gaara si ay uga hadlaan kulanka xiga ee caadiga ah ee guddiga Kaaliyaha Fulinta ee Isuduwaha iyo Guddiga Dugsiga, ama wakiilkiisa, ayaa qaban doona qori-tuur kadib waqtiga kamadanbaysta gudbinta si loo cayimo 10 ka hadlaya. Dadka ku soo gudbiya waqti habboon Codsiga Isgaarsiinta Gaarka ah waxa la ogeysiin doonaa natiijada qori-tuurka.
 - 3.4. Codsiyada Isgaarsiinta Gaarka ah laguma bixiyo kulanada gaarka ah ama xalladaha degdegga ah.

- 3.5. Dhiibitaanka Codsiga Isgaarsiinta Gaarka ah iyo wixii macluumaad laxiriira waxa lala wadaagaa xubnaha guddiga kahor kulanka.

4. **Tilmaamaha Guud**

- 4.1 Hadlayaashu waxay si xushmad leh u dhiibi karaa faallo ku saabsan hawlgallada dugsiga ama degmada ama barnaamijyada, laakiin cabashooyinka ku saabsan shaqaale gaar ah ama shaqsiyaad kale laguma dhegeysan doono fadhi dhegeysiga bulshada dadweynaha.
- 4.2 Xubnaha dadweynaha ee ka soo hor muuqda guddiga waa in la xusuusiyaa in su'aalaha iyo codsiyada loo jeediyo guddiga inta badan dib loo dhigi doono inta laga gaarayo tixgelinta maamul iyo guddiga ee habboon.
- 4.3 Haddii afhayeen kasta uusan u hoggaansamin tilmaamaha kor ku xusan, guddoomiyuhu wuxuu xukumi karaa in af -hayeenku uu nidaamsan yahay oo laga yaabo inuu u baahdo af -hayeenku inuu soo afjaro soo -jeedintiisa. Hadlayaasha si sharci looga joojiyaa lagama yaabo inay ka hadlaan kulannada mustaqbalka muddo lix bilood ah.
- 4.4. Hadlayaasha ka xaajoonaya qodobada ajendaha, iyo weliba hadlayaasha wata Codsiga Isgaarsiinta Gaarka ah ma siin karaan waqtigooda hadle kale. Hadlayaashu iskuma darsan karaan waqtiyadooda iyo kalka ay hadlayaan oo aan lagala beddelan karin. Haddii hadle ku soo biiro dhiibitaanka hadle kale, qof kale waa inuu ahaado daneeye ama wakiil daneeye oo hadlayaashu ma heli doonaan waqti ay ku dhiibaan faallooyinkooda ay isku darsadeen.